

Waa maxay Dhinacyada Early Achievers ee Gaar ahaanshaha?

Child Care Aware of Washington waxay ballan qaaday in caawiso qoysaska in ay helaan daryeel carruurta ah oo aad u fiican iyo ka caawinta adeeg bixiyayaasha daryeelka ilmaha gobolkayaga in ay gudbiyaan daryeel tayo sareeya. Waxaa mahadsan Early Achievers, qiimaynta tayada Washington iyo horumarinta nidaamka. Waalidka hadda waxay leeyihiin nidaamka qiimaynta oo oo si fudud loo fahmi karo si ay uga caawiso iyaga in ay sameeyaan ikhtiyaaro daryeelka carruurta oo aad looga war qabo.

Early Achievers waa mid dhammaystiran, goboladoo dhan, barnaamij cilmi baadhid ku salaysan taas oo bixisa taageero lacag la'aan ah iyo ilo, sida tababarka iyo wax u dhigista, adeeg bixiyayaasha daryeelka carruurta sidaasna waxay ku samayn karaan horumar barnaamijooda ah. Early Achievers nidaamka qiimaynta tayada oo fudud in la fahmo kaas oo ka caawiyo qoysaska in ay helaan barnaamijyada daryeelka carruurta kuwaas oo qayb ka ah dedaadala horumarinta joogtada ee is dab jooga ah oo tayadooda ay ansixiyay Jaamaca Washington (UW).

Qaar ka mod ah Adeeg bixiyayaasha Early Achievers waxay ku takhasuseen dhinacyo muhiim ah oo korinta carruurta ah. Dhinacyadan Gaar ahaanshaha waxaa qorsheeyay UW muddada qiimaynta meesha ah. Way yihiin:

Is dhex galka iyo Deegaanka

Tani waa khibrada ilmaha ee ku jirta deegaanka waxbarashada. Waxay tixraacdaa is dhex galka daryeel bixiyayaasha carruurta haya iyo sida is dhex galkan ay u abuuraan mid taageero leh, xidhiidh barbaarin leh oo u horumariso waxbarashada. Sidoo kale waxay tixraacdaa sida meeshada barnaamijka daryeelka carruurta, agabka, jadwalka iyo habka caadiga ah loo aqoonsanyahay in ay kor u qaadaan wax barashada oo ay u wayneeyaan ka qayb galka carruurta. Ugu dambayntii, waxay tixraacdaa kala duwanaanshaha agabka waxbarashada iyo hawlaha barnaamijka carruurta.

Manhajka iyo Taageerada Shaqaalaha

Tani waxay tixraacaysaa barnaamijka waxbarashada adeeg bixiyaha daryeelka ilmaha haysto oo ka mid ah carruurta iyo qoysaska, oo isticmaala iskaashiga qoyska si loo caawiyo waxbarashada carruurta. Sidoo kale Macmnaheedu waxa weeye in adeeg bixiyahu uu leeyahay manhaj la jaanqaada Barashada Hore ee Gobolka Washington iyo Shuruucda Horumarinta iyo taageerada horumarinta ilmaha iyo tilmaamaha la gaar yeelay. Ugu dambayn, waxay sheegtaa in adeeg bixiyahay uu hubiyo in shaqaalihisu haystaan taageerada, wakhtiga qorshaynta casharka iyo fursadaha tababarka.

Xirfad Yaqaanimada Shaqaalaha

Tani waxay tixraacaysaa horumarka xirfadeed ee daryeel bixiyaha iyo macalimiinta. Taas macnaheedu waxay weeye in shaqaalaha barnaamijkan ay leeyihiin tababar muhiim ah iyo waxbarasho sare, iyo in heerarka barnaamijyada waxbarashada ee la jaanqaada shuruucda gobolka ee xirfadyaqaanimada macalinka.

Ka qayb galka Qoysa iyo Iskaashiga

Tani waxay tixraacdaa xidhiidhada adeeg bixiyaha ee qoysaska. Adeeg bixiyayaashu waxay dhisaan xidhiidhka qoysaska ee carruurta daryeelkooda ku jira iyagoo hubinaya wada xidhiidhka joogtada ah, oo siinaya qoysaska ilaha iyo taageerada carruurtooda markay u wareegaan dugsiga barbaarinta.

Natiijooyinka Carruurta

Tani waxay tixraacdaa waxbarashada horumarka loo kaso iyo hawlaha ku buuxiya baahiya gaarka ah ee ilmaha. Adeeg bixiyayashu ku wanaagsan dhinacan waxay bixiyaan baadhitaanka carruurta si ay u arkaan walaacyada suuragalka ah ee horumarinta. Oo ay bixiyaan qiimaynta joogtada ah ee lagaga warhaynayo hrumarka ilma kasta. Macluumaadkan waxaa lala wadaagaa qoysaska si kor loogu qaado diyaar ahaanshaha dugsiga.

Haddii aad u baahantahay baadhida caawimo dheeraad ah oo ilmahaaga ah , fadlan la xidhiidh 1-800-446-1114 ama booqo <http://wa.childcareaware.org/families>.

